

Shirar ay kalsooni ku dheehan tahay.

CODAD BUKAANSOCOD

"Tan igu dhacday looma baahna inay cid kale qabsato. Markaanse warqad u qoray Golaha bukaansocodka (Patientnämnden) wax badan ayaa daryeeluhu ka baddelay nidaamka shaqadiisa."

"Golaha bukaansocodka (Patientnämnden) waxaa jooga hawladeenno waqti ay kugu dhegeystaan ku siiya."

"Waxaan helay caawinaad wanaagsan markaan bukaansocod ahaan waayey meel kale ee aan wax u raacdo."

"Si wanaagsan ayaa la ii qaabilay, waxaana helay warbixin wax-ku-ool ah."

**Ku soo dhawoow inaad la xiriirto
Golaha bukaansocodka (Patient-
nämnden)**

08-690 67 00 (8.30–16.00)

Cinwaan boosto:
Patientnämndens förvaltning
Box 17535, 118 91 Stockholm

Cinwaan booqasho:
Hornsgatan 15, Stockholm

Fax 08-690 67 18

E-boosto registrator@pan.sll.se

www.patientnamndenstockholm.se



Dhibaato?

Daryeelka aad heshay ma ka qabtaa su'aalo,
fikrado ama dacwo?

La xiriir Golaha bukaansocodka.

Daryeelka ma ka qabtaa fikrado, dacwo ama su'aalo?

Nala soo xiriir!

Haddaadan ku qanacsaneyn daryeelka, soo dhaweynta ama nidaamka haynta adiga ama ruux ka mid ah xigtadaada la soo gudboonaaday, waxaad fikradahaaga si bilaash ah ugu jeedin kartaa Golaha bukaansocodka (Patientnämnden). Golahu waa maamul madaxbannaan oo dhexdhexaad ah oo sida sharciyo qorayo ka jira dhammaan maamulada gobollada waddanka. Halakan waxaad u soo gudbineysaa fikradaha khuseeya dhammaan wixii daryeel ah ee ay kharashkiisa dowladdu bixiso. *

Golaha bukaansocodka muxuu qabtaa?

- Inaan kaa dhegysano fikradahaaga, baarno wixii dhacay, xal soo jeedino oo aan ku dadaalno inaan saxno wixii qaldan.
- Inaan xiriir wanaagsan ka dhex dhalinno adiga iyo hawlwadeennada daryeelka.
- Inaan ka warbixinno nidaamka daryeelka, xaquuqdaada iyo fursadaha aad u leedahay inaad saameyn ku yeelato dryeelka lagu siiyo.
- Haddii loo baahdo waxaan kugu hageynaa maamullo kale ee dhibaataadaada wax kaaga qabta.
- Awood uma lihin xaalmarin iyo iqaab, balse waxaan kugu caawineynaa inaan kugu hagaajinno maamullada kale.
- Inaan ka shaqeyno wanaajinta daryeelka. Haddaad dhibaataada kaa heysata daryeelka kala xiriirto Golaha bukaansocodka (Patientnämnden) waxaad gacan ka geysaneysaa in la ogaado qaladdaadka iyo gabaabsiga jira.
- Waxaan wadnaa tirokooby ballaaran oo faa'ido u ah daryeelka dambe. Waxaan siiba tooshka ku ifinnaa ammaanka bukaanka oo ka mid ah qeybaha ugu muhiimsan ee tayada daryeelka.

Sidaan ayaad noo xiriirin kartaa:

Telefon

Telefon 08-690 67 00 (8.30–16.00)

Telefax 08-690 67 18

Haddaad dooneyso adigoo aqoonsigaaga inoo sheegin ayaad na soo wici kartaa, waa haddii su'aashaadu ay ku saabsan tahay nidaamka jira ee arrintaada khuseeya.



E-post

registrator@pan.sll.se

Si fudud oo la fahmi karo u soo bandhig arrintaada ama codso inuu gacanhaye kula soo xiriirto si uu ku siiyo warbixin faahfaahsan.



Warqad

Patientnämndens förvaltning
Box 17535, 118 91 Stockholm

Waxaa na saaran mas'uuliyad sir-xajin.



Kumeynu nahay?

Golaha bukaansocodka (Patientnämnden) wuxuu leeyahay maamul. Halkaas oo ay ka shaqeyaan dad awood xirfadeed iyo waayoaragnimo ballaaran u leh arrimaha daryeelka caafimaad iyo sharciyada. Waxaan kaa guddoomeynaa wax allaaleh iyo wixii fikrad ah ee daryeel caafimaad ku saabsan cid kastaba ha ka yimaadee.

* Daryeel ay dowladdu kharashkiisa bixiso waxaa loola jeedaa daryeelka caafimaad ee laga helo maamulka gobolka, daryeelka caafimaad iyo ku xannaaneynta degaannada gaarka ah ee laga helo degmada, daryeelka laga helo shirkadaha gaarka ah, daryeelka ilkaha dadweynaha, daryeelka ilkaha ee uu kharashkiisu maamulka gobolka bixiyo iyo daryeelka nadaafadda ilkaha iyo afka ee laga helo shirkadaha gaarka ah.